



Australian Government



ParentsNext

Riboodhgareynta horuumarkaaga



Markii aad ka qayb qaadaneysid ParentsNext, waxaad u baahan kartaa inaad ka warbixisid waxqabadyadaada.

La-taliyahaaga ParentsNext ayaa kuu sheegi doona waxa aad ka warbixineysid iyo maalmaha warbixintaada.

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad **si gooni ah uga warbixisid Centrelink iyo ParentsNext** - waxaad ku soo wargelin kartaa taleefan ama khadka tooska ah.

MUHIIM

Si aad usii wadid helitaanka Lacag Bixinta Parenting Payment waa muhiim inaad soo sheegtid maalmaha uu cayimay la-taliyahaagu. Haddii aadan sameyn lacagtaada way saameyn kartaa.

Haddii wax dhacaan oo aadan soo sheegi karin maalinta, u sheeg la-taliyahaaga sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah si looga hortago in lacag-bixintaada ay saameyn ku yeelato. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u baahato inaad la hadashid Centrelink.

Warbixinta khadka tooska ah

Waxaad ku warbixin kartaa **Centrelink** adoo u maraya **shabakada myGov** ama **Express Plus Centrelink** moobilka. Waxaad uga warbixin kartaa **ParentsNext** barnaamijka **Job Seeker**.

La-taliyahaaga ayaa ku caawin kara **haddii aad u baahan tahay caawimaad sameynta akowankaaga myGov** ama ku xidhiidhinta akowankaaga myGov.

Warbixinta Centrelink

Ka warbixi dakhligaaga iyo **xaqiiqi inaad buuxisay shuruudaha** qorshahaaga.

Warbixinta ParentsNext

Xaqiiqi inaad kaqeyb gashay nashaadaadka kujira Qorshahaaga Kaqeybgalka.

Tilmaamaha loogu talagalay warbixinta ParentsNext



Haddii aadan ka warbixin karin khadka tooska ah, waxaad wici kartaa la-taliyahaaga maalinta warbixintaada waxayna kaa caawin doonaan ka warbixinta.



Waad iska diiwaan gelin kartaa si aad uheshid xusuusiin ahaan SMS, iyada oo loo marayo barnaamijka **Job Seeker**, ama emayl ahaan. Weydii la-taliyahaaga wixii macluumaad dheeraad ah.



Waad ku dari kartaa ballanqaadka qoyskaaga jadwalka taariikhda ee ku jira barnaamijka **Job Seeker** ama waxaad u sheegi kartaa la-taliyahaaga, si ay u jadwalaan howlaha ku habboon noloshu qoyskaaga.

Waxii macluumaad intaa dhaafsiisan tag dese.gov.au/parentsnext